

Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q3AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?



Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q3AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?Guurowgaan magaciisa waxaa la yiraahdaa: "**Waa ku diriraan**" wuxuu ka hadlayo is la guurowga ayaad ka dhex heli doontaa iyo waxa lagu dirirayo, waxaanse la illoobi karin in **Abwaan Maxammad Gacal Xaayow (A.U.N)** uu ahaa Abwaanka kaliya ee Soomaaliyeed ee aan weligii u maansoon una gabyin, ama guuroobin, qabiil, Qabyaalad, qola is ka celin, deegaan iyo gobol gaara intaba. sidaa aawgeed wuxuu halabuurkiisa u adeegsaday dhanka xagasha quman, ee waddaniyaddu ku dhantahay, marka aad u dhabba gasho suugaantiisa ama aad barbar dhigto kuwa badan oo aan abwaanna u naqaanno, waxaad kasoo helee Suugaantooda ama heesaha ay curiyeen kuwa maldahan ama deegaan gaar ah lagu ammaanayo, waana meelaha ay ku qaldaan dadka aan fahan sanayn dedanta Suugaanta.

Abwaan Maxammad Gacal Xaayow Eebbe ayaa ka bad-baadiyay inow ummaddiisa uga tago erayo caaddifadaysan ama kala gaynaya, waana sida laga doonayo ruux kasta oo hal-abuur ah, bulshadana wax u bidhaaminaya. Haddaba guurowgii "**WAA KU DIRIRAAN**" aan idiin kala dhex boxo ee ka bigasho wacan!"Aqal deena Doolliya bisadi, Waa ku diriraaneDoqon iyo nin door raganimada, Waa ku diriraaneLaba doob garoob laba da'asaday, Waa ku diriraaneDigniin amar debleey iyo Sarkaal, Waa ku diriraaneDeeqsi iyo bakhiiil raganimada, Waa ku diriraaneOday habar ka doogsaday haddoow, Daalli kale yeeshoDuqdi horaya tii daba ka gala, Waa ku diriraaneDugsi macallin ootaye mid kale, Looga deris yeelayHaddii lays ku diro Diiniyada, Waa ku diriraaneDiyaarada colaadeed walaal, Waa ku diriraaneDad is jecel wax dheef lays ku deray, Waa ku diriraaneGobannimo nin diidaya nin raba, Waa ku diriraanee.Derisnimo xaqeed iyo inaan, Dhalasho door soominWaxa loo daliishaday haddaan, Dowgi garan waynayDugsi weeye nabadduye haddii, Derinti loo laabayHaddii door wareenkiyo warmihi, Layska daba tuurayDoqowdiyo cuqaashiyo haddaan, Odaya doodayninHaddii Culama Diinlihi Cilmigi, Deeq u bixi waydayDuf caddiyo Suldaannadi haddii, Laga dambeey waayayDambasteeda waa lagu gubtaa, Diga colaadeedeWaxaa dacalka laysugu dhiftaa, Dogobba NaareedeDabeecadaba looga ma ekaan, Ehalu DiineedeDaa'imow Allahayow adaan, Daawa heli wayneDebka horay baktii deeq Allaa, Lagu ducaystaahee.Deegaanka dumayuu ma bogin, Degel ka qiiqaysaDaaraha dumaayuu ma bogin, DegegentoodiiyeeDadka kala dabayshaday marbaa, Laysu dumayaahedagaalka u dhexeyuu ma bogi, Dira-diraalow'eHaba lays ku daalee dib waa, Laga heshiiyaahedalka kala go'aayuu ma bogin, Doonni kala raaceDaa'imow Allahayow adaan, Daawa heli weyneDebka horay baktii deeq Allaa, Lagu duceystaahee.Waabaaya duug iyo sunbaa, Lagu dabiibaahedambar laga lisiyo deeq la mida, Laga duceyn maayeGu' darrimay iyo Dayr is xigay, Daawa lagu waayayEe inya Dalkii looga baxay, Dibadda loo aadayDoqonka deegaanka gubay, Waa la soo dirayeDaa'imow Allahayow adaan, Daawa heli wayneDebka horay baktii deeq Allaa, Lagu ducaystaahee. **W/D: Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?**